# Outreach Newsletter

A MONTHLY BILINGUAL PUBLICATION OF SOMALICAN/ ISSN 2168 – 5363

## FEBRUARY 2016 EDITION

VOLUME VIII; 2ND EDITION

## In this Edition

1. CelebrateOne, United Health Foundation to Expand Program Focused on Reducing Infant Mortality Rates ……..…………………………………………………..…..2-7

2. Community Resources:…………………………………………………………..….8

## Qormooyinka Caddadkan

1. CelebrateOne, United Health Foundation oo Ballaarinaya Barnaamij lagu Dhimayo Tirada Dhimashada Dhallaanka: …..………………………………………………..…2-7

2. Adeegga Bulshada: …...…....…………………………………………………….…....8

The SomaliCAN Outreach Newsletter is a bilingual publication of the Somali Community Access Network in Columbus, Ohio. If you have questions or story ideas for making our schools, hospitals or other community resource centers more effective in meeting the needs of special populations including new Americans and people with developmental disabilities, please do not hesitate to contact the SomaliCAN Outreach Newsletter editorial team. We can be reached by phone at 614-439-3034 or e-mail us at info@SomaliCAN.org.

 ISSN 2168 - 5363

# CelebrateOne, United Health Foundation oo Ballaarinaya Barnaamij lagu Dhimayo Tirada Dhimashada Dhallaanka

Waaxda Caafimaadka Columbus, oo taageeraysa CelebrateOne, ayaa shaqaalaysiinaysa 72 shaqaalaha caafimaadka bulshada ah oo xiriir la samayn doona haweenka xilliga dhalmada ku jira si hoos loogu dhigo dhimashada dhallaanka ee siddeed xaafadood. Deeq dhan $1.7 milyan ayay barnaamijka ugu ku bixisay mu'asasada United Health Foundation. SomaliCAN ayaa soo xuli doonta afar ka mid ah shaqaalaha bulshada caafimaadka oo u adeegi doona jaaliyadaha laga tirade badanyahay sida Soomaalida iyo Nepali-ga.

Deeqda ayaa gacan ka geysan doonta sidii wax looga qaban lahaa dhibaatooyinka caafimaadka dadweynaha Ohio. Sida ay muujinayso warbixinta United Health Foundation ee heerarka caafimaadka Maraykanka, Ohio ayaa gashay kaalinta 44 dhanka dhimashada dhallaanka dalka iyada oo in ka badan toddobo ka mid ah kunkii dhallaan ahba ay dhintaan inta aanay hal sano gaarin.

"CelebrateOne waxaa ka go'an in hantida ugu wanaagsan ee bulshadeennu u hibayn karto dhallaan walba ay tahay in la dhowro caafimaadka dhallaanka sannadka ugu horreeya nolosha si waddada loogu xaaro nolol caafimaad leh sannadaha dambe oo dhan," ayay tir Liane Egle, madaxa CelebrateOne.

"Deeqda United Health Foundation waxay lama huraan u tahay bulshada sababta oo ah tababbarka iyo xirfadda ay kororsadaan shaqaalaha caafimaadka ayaa ku nagaanaya bulshada saamayn wanaagsanna ku yeelan doona qoysaska lala shaqeeyo."

**Wada Shaqayn Hirgelinaysa in Shaqaale Caafimaad laga Qoro Xaafadaha si ay ula Xiriiraan Hooyooyinka**

CelebrateOne waa hindise lagu dhexgelayo bulshada oo ay hormuud ka tahay waaxda caafimaadka Columbus iyo Guddiga Guud ee Dhallaanka Columbus si hoos loogu dhigo dhimashada dhallaanka illaa 40% isla markaasna kala bar loo dhimo kala farqiga isirka ku salaysan ee xaaladda caafimaad marka la gaaro sannadka 2020.

Deeqda United Health Foundation oo socon doonta saddex sano waxay fududayn doontaa in 72 shaqaale caafimaad ah la siiyo tababbar taas oo sare u qaadaysa tirada shaqaalaha caafimaadka bulshada ee samayn kara xiriir, abuuri kara kalsooni, …. See page 3

 ISSN 2168 - 5363

# … CelebrateOne, United Health Foundation oo Ballaarinaya Barnaamij lagu Dhimayo Tirada Dhimashada Dhallaanka

…hoosna u dhigi kara caqabadaha daryeelka si loo yareeyo halista jirrooyinka keena dhimashada dhallaanka.

Ujeeddadu waa in shaqaalaha caafimaadka bulshada ee barnaamijka ka shaqaynaya ay sannad walba la xiriiraan 27,000 haween ah oo ku kala dhaqan xaafadaha Linden, Koonfurta, Bariga, Hilltop, Franklinton, Morse iyo 161-ka, Waqooyi Bari iyo Koonfur Bari.

Shaqaalaha caafimaadka bulshada waxaa la siin doonaa aqoon kororsi mushaarkiisa ay bixinayso CelebrateOne waxayna la shaqayn doonaan xaafadaha loo asteeyay ee Columbus.

Marka la isku daro, siddeeddan xaafadood waa meelaha ugu badan ee dhallaanku ku le’daan iyada oo 42% dhimashada dhallaanka ah halka ay ku dhashaan keliya 29 boqolkiiba carruurta degmada Franklin ku dhalata.

“U dabbaalgegga sannad jirsashadu waa tallaabo muhiim ah, waana mid si gaar ah bulshadeenna ahmiyad ugu leh,” ayuu yiri Duqa Magaalada Columbus Andrew Ginther.

“Waxaan uga mahad celinayaa United Health Foundation iskaashiga keenay in CelebrateOne ay xiriir la samayso haween fara badan kuna xiriiriso daryeel caafimaad oo leh ka hortagga, uurreyda, iyo ilmaha ee lama huraanka u ah dhimashada dhallaanka ee ku baahsan Columbus.

“Wada shaqaynta caynkan ah ee ku salaysan hindise bulsho oo casri ah ayaa muhiim u ah sare u qaadidda caafimaadka bulshada dalka oo dhan, iyo gaar ahaan halkan Columbus.,” waxaa sidaas tiri Tracy Davidson oo ah Madaxa United Healthcare Community Plan of Ohio.

“In lagu xiriiriyo hooyooyinka iyo haweenka uurka leh shaqaale xirfad u leh caafimaadka bulshada oo deris la ah iyo adeegyo noloshooda wax ka baddela waxay suurta gelinaysaa in hooyooyinkan iyo dhallaankoodu ay caafimaad ku noolaadaan.”

“Waxaan jeclaan lahaa in aan uga mahad celiyo United Health Foundation iyo CelebrateOne shaqada ay ku taageerayaan hooyooyinka uurka leh iyo dhallaankaba sidii ay u heli lahaayeen adeegyo iyo daryeelka ay baahida u qabaan.

 ISSN 2168 - 5363

# … CelebrateOne, United Health Foundation oo Ballaarinaya Barnaamij lagu Dhimayo Tirada Dhimashada Dhallaanka

Aniga oo aabbe u ah afar gabdhood, waxaan ku faraxsanahay dedaalka lagu daryeelayo bulshada si loo kobciyo caafimaadka dhallaanka iyo qoyska," ayuu yiri Congressman Pat Tineri (R-OH). "Iskaashiga ka dhexeeya waaxda caafimaadka Columbus iyo United Health Foundation waa nooca wada shaqaynta loo baahanyahay si loo xalliyo dhibaatooyinka caafimaadka ee ugu adag," ayuu yiri Congressman Steve Stivers (R-OH). "Marka la isu xilqaamo hindisiyaal sida CelebrateOne u wanaagsan, waxaa iskaashiga dowladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ka dhexeeya ka faa'iidaysanaya bulshada oo caafimaad wanaagsan ku naalloon doonta hantideenna ugu qiimaha badan oo awlaadda ahna caafimaadkooda dhawri doonta." "Barnaamijkan maanta la shaaciyay wuxuu war wanaagsan u yahay qoysas aan tiro yarayn waana daliil cad oo muujinaysa sida United Health Foundation iyo CelebrateOne ay uga go'an tahay in ay ku gacan siiyaan dhallaanku in ay si habsami ah u barbaaraan.," ayay tiri Congresswoman Joyce Beatty (D-OH).

"Waan arkay in waalidiin badan oo degaanka ah ay farta wadnaha ku hayaan. Ma aha in hooyo ama aabbe ay mar dambe la welwelaan niyadjabka in dhallaan ka dhinto."

**Ku Xallinta Dhibaato Caafimaad oo Baaxad leh Heer Degaan**

Iyada oo Ohio ay ka mid tahay gobollada ugu badan ee dhallaanku ku saqiiraan dalka oo dhan, in la qaado tallaabo lagu xallinayo arrintan halista ku ah caafimaadka dadweynaha si loo horumariyo caafimaadka dadka Columbus. Tirakoobka waaxda caafimaadka Columbus ayaa muujinaya in degmada Franklin oo keliya ay qiyaastii 150 dhallaan ahi ku saqiiraan sannad walba iyaga oo aan gaarin hal sano jir. CelebrateOne oo kaashanaysa United Health Foundation ayaa diyaarin doonta shaqaale xiriiriya bulshada oo ujeeddadoodu tahay in la kordhiyo tirada haweenka da'da dhalmada ku jira ee xiriirka la leh adeegyada caafimaad iyo bulsho ee ka jira xaafadahooda iyo bulshada ay ku dhex noolyihiin. Barnaamijku wuxuu kula kulmay kumannaan haween ah bandhigyada caafimaadka, xarumaha diinta, goobaha bulshada, shirarka bulshada rayidka ah, iyo kulammo kale. Eeg bogga 5

 ISSN 2168 - 5363

# … CelebrateOne, United Health Foundation oo Ballaarinaya Barnaamij lagu Dhimayo Tirada Dhimashada Dhallaanka

Lille Banner oo ka mid ah shaqaalaha caafimaadka bulshada xaafadda Reeb-Hosack ee koonfurta Columbus ayaa yiri "Barnaamijka caynkan ah wuxuu yeelan karaa saamayn loo aayo markii aan qoysaska ugu tagno albaab walba, xaafadahooda ku hor fariisanno. Jawaabta ay bixinayaan dadka ka qaybgelaya waa mid aad u wanaagsan oo isbaddel weyn keenaysa. Wada shaqayntan United Health Foundation waxay ka dhigan tahay in haween iyo carruur badan ay ku noolaan doonaan caafimaad qab, farxad iyo raynrayn.

Waxaa deeqda looga dhawaaqay xaflad dhalasho oo bulshada loogu dhigay Reeb Avenue Center oo duqa magaalada Columbus Ginther uu kala qaybgalay madax ay ka mid yihiin John McCarthy, madaxa hay'adda Medicaidka Ohio, madaxa waaxda caafimaadka Columbus Teresa Long, madaxweyne sugaha dowladda hoose ee Columbus Priscilla Tyson, madaxweynaha guddiga degmada Franklin John O'Grady, Jim Hughes oo xubin ka ah aqalka sare ee gobolka… Hearcel Craig oo xubin ka ah golaha wakiillada gobolka, Cheryl Grossman iyo Dave Leland, Sue Wolf, hoggaan bulsho, iyo dad hore ama hadda uga qaybgelaya CelebrateOne, shuraakada barnaamijka iyo qoysas si loogu dabbaal dego sannadka ugu horreeya ee barnaamijka, guulihii uu horay u soo hooyay iyo qoondada cusub ee lagu ballaarinayo saamaynta barnaamijka. Dhowr hay'adood ayaa lagu sharfay kaalinta ay ku leeyihiin iyo taageerada. ay siiyaan barnaamijka waxaana ka mid ahaa jaamacadda Ohio State University College of Nursing, Community Development for All People, Men 4 the Movement, J. Jireh Ministries, Partner for Achieving Community Transformation (PACT), The Neighborhood House, St. Stephen's Community House, Gladden Community House, YMCA, Somalican, Central Ohio Workforce Investment Corporation iyo Columbus Neighborhood Pride Centers.

# CelebrateOne, United Health Foundation to Expand Program Focused on Reducing Infant Mortality Rates -

Columbus Public Health, in support of CelebrateOne, will add 72 new community health workers to conduct outreach to women of childbearing age to help reduce infant mortality in eight Columbus communities, funded by a $1.7 million partnership grant from United Health Foundation. SomaliCAN will recruit four community connectors from underserved communities including the Somali and Bhutanese/Nepali communities.

The grant will help address a critical public health need in Ohio. According to United Health Foundation's America's Health Rankings®, Ohio ranks 44th in the nation in infant mortality, with more than seven infant deaths before the age of one for every 1,000 live births.

"CelebrateOne is committed to the idea that the greatest gift our community can give each baby is a healthy and safe first year of life, setting him or her on a path to thrive each year beyond that," said Liane Egle, director, CelebrateOne. "This grant from United Health Foundation is critical because the training and community building will have lasting and positive effects on these families the program reaches."

**Collaboration Will Bolster Community-based Caregivers to Engage Moms and Moms-to-Be**

CelebrateOne is a community-engagement initiative led by Columbus Public Health and the Greater Columbus Mortality Task Force to reduce infant mortality by 40 percent and halve the racial health disparity gap by 2020.

United Health Foundation's grant over the next three years will enable 72 Community Health Workers to receive training, helping expand the number of community-based caregivers that are able to conduct outreach, build trust, and reduce barriers to care to help reduce the risk for increased rates of chronic morbidity and infant mortality.

The goal is for the trained Community Health Workers to reach 27,000 women each year through the program in the Columbus communities of Linden, Near South Side, Near East Side, Hilltop, Franklinton, Morse Rd-161, the Northeast and Southeast. The Community Health Workers will receive paid internships with CelebrateOne and work in the targeted Columbus communities.

 ISSN 2168 - 5363

## CelebrateOne, United Health Foundation to Expand Program Focused on Reducing Infant Mortality…

Combined, these eight communities account for 42 percent of all Franklin County infant deaths, but make up only 29 percent of all Franklin County births.

"Celebrating a baby's first birthday is always a meaningful milestone, and in our community it is an especially critical one," said Columbus Mayor Andrew Ginther.

"Thanks to partners like United Health Foundation, CelebrateOne is reaching out and connecting more women with preventive, prenatal and well-baby care, which is essential to ending the infant mortality epidemic Columbus faces."

"These types of collaborative, innovative community-based initiatives are important to improving health outcomes in communities across the nation, including right here in Columbus," said Tracy Davidson, CEO, UnitedHealthcare Community Plan of Ohio.

"Connecting moms and moms-to-be with trained health workers in their communities and resources that can make a difference in their lives will help these babies and their moms live healthier lives."

"I would like to thank United Health Foundation and CelebrateOne for their work to help moms, expectant mothers and infants access the resources and care they need.

As a father of four daughters, I am grateful for their efforts to help our community thrive with healthier babies and stronger families," said Congressman Pat Tiberi (R-OH).

"The partnership between Columbus Public Health and United Health Foundation is exactly the type of collaborative approach we need to tackle our toughest health care challenges," said Congressman Steve Stivers (R-OH).

"By focusing on initiatives like CelebrateOne, this public-private partnership will help community members live better lives and keep our most precious resource, our children, safe and healthy."

"Today's announcement is excellent news for countless area families, and illustrates United Health Foundation's and CelebrateOne's commitment to ensuring every child has the opportunity to celebrate life's many milestones," said Congresswoman Joyce Beatty (D-OH).

…Continued on page 7…

 ISSN 2168 - 5363

# …CelebrateOne, United Health Foundation to Expand Program Focused on Reducing Infant Mortality

"I have seen the heartache of so many parents and future parents in our community. No mom or dad should ever have to experience the gut-wrenching loss of a child."

**Tackling a Serious Public Health Crisis at the Local Level**

With Ohio having one of the highest rates of infant mortality in the nation, taking steps to address this public health crisis is critical to improving people's health in Columbus.

Columbus Public Health statistics show that in Franklin County alone, approximately 150 babies die each year before reaching the age of one.

CelebrateOne, in collaboration with United Health Foundation, will bolster the Community Connector Corp, which seeks to increase the number of women of childbearing age connected to health and social support within their communities and social networks.

The program has engaged thousands of women and families at health fairs, churches, community centers, civic meetings and support groups.

Lillie Banner, who is part of the Community Connector Corp in the South Side, Reeb-Hosack neighborhood of Columbus, said: "This type of program will have a lasting impact as we reach out to families door to door, face to face and within their neighborhoods. The response we've seen from participants is overwhelmingly positive and life-changing.

This collaboration with United Health Foundation will mean even more women and their babies will be stronger, healthier and happier."

The grant was announced at a community birthday party and educational resource fair at the Reeb Avenue Center where Mayor Ginther joined community leaders, including John McCarthy, director Ohio Department of Medicaid, Teresa Long, Columbus Public Health commissioner, Priscilla Tyson, president pro tem, Columbus City Council, John O'Grady, president, Franklin County Board of Commissioners, State Sen. Jim Hughes, State Representatives Hearcel Craig, Cheryl Grossman and Dave Leland, Sue Wolf, community leader, and current and former CelebrateOne participants, project partners and families to celebrate the first year of the program, its early success and the new funding to expand the program's reach. Several project partners were recognized for their ongoing support for the program, including the Ohio State University College of Nursing, Community Development for All People, Men 4 the Movement, J. Jireh Ministries, Partner for Achieving Community Transformation (PACT), The Neighborhood House, St. Stephen's Community House, Gladden Community House, YMCA, Somalican, Central Ohio Workforce Investment Corporation and Columbus Neighborhood Pride Centers.

### END###

# Central Ohio Community Resources

**Police:**
Emergency: 9-1-1
Non-emergency: 614-645-4545
Sheriff: 614-462-3333

**Mental Health Crisis:**
Netcare Access: 614-276-2273

**Poison Control: 1**-800-222-1222

Columbus Health Department
Free Clinic: 614-240-7430

**Legal Matters:**
Legal Aid Society: 614-241-2001

**Child Abuse and Neglect:**
FCCS**: 614-**229-7000

**Housing:**
CMHA: 614-421-6000

**Information and Referral:**
HandsOn: 614-221-2555 or 211

**Somali Services**

**SomaliCAN**
614-489-9226
www.SomaliCAN.org

The Omolesky Law Firm
614-441-5305

## SOMALICAN SERVICES:

**Health Communication and Literacy:**
- Patient education
- Prescription access
- Cultural competency training
- Information & Referral

**Community Education:**
- Youth engagement
- Services in Schools
- Advocacy and Support
- Scholarships
- Annual Graduation
- Crime Prevention
- Disaster Preparedness

**SomaliCAN Outreach Newsletter:**
- Monthly bilingual newsletter
- Advertisements
- Articles
- Cultural Competency
- Research
- Legislation
- Developmental Disabilities

**Immigration Services:**
- Green card applications
- Citizenship applications
- Citizenship education

**Somali Interpretation & Translation:**

Do you require highly qualified legal interpreters and translators in an Ohio court, law office, federal agency or other venues? SomaliCAN is the most reliable source of highly competent professional Somali court /legal interpreters and translators in Ohio and around the United States and globally.

Please contact a SomaliCAN specialist today. SomaliCAN provides interpretation and translation in social services, medical, legal, academic and financial settings.

SomaliCAN
Phone. (614)489-9226
Fax: (614) 448-4395
E-mail:
info@somalican.org

To advertise a product or service, contact us today: info@somalican.org.

Ohio Developmental Disabilities Council

Funded by the Ohio Developmental Disabilities Council under the Developmental Disabilities Assistance and Bill of Rights Act, Public Law 106-402.

To request a copy of SomaliCAN Outreach Newsletter send an e-mail to Outreach@SomaliCAN.org or visit www.SomaliCAN.org.